

Wargeyska Mountain View

Febraayo 22, 2017

Talaado, Febraayo 28.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha, 8:15 @Qolka
Shirka CLC 183

Talaado, Febraayo 28.....Shirarka Ardayga/Tababaraha/Waalidka

Qamiis, Maarso 2.....Shirarka Ardayga/Tababaraha/Waalidka

Jimco, Maarso 3.....Ma Jiro Dugsi, Tababareyaasha Waxay Qaadan Doonaan Fasalada
Aqoonyaanka

Fariinta Agaasimaha

Waxaan rabaa in aan qof kasta xasuusiyo fursadda aad kula kullantid macalinka cunugaada todobaadka soo socda. Waxaad maqli doontaa waxa ardaygaada barto. Waxaad ogaan doontaa meelaha uu cunugaada ku xoog badan yahay dugsiga iyo waxaad awood u yeelan doontaa in aad ka qeybqaadatid kaalmada la siiyo cunugaada si uu u samaysto ujeedo loo baahan yahay in uu ka shaqeeyo inta ka hartay sannadka. Waxaan kuu diyaarin doonaa kaararka warbixinta, si aad uga hadashid, sidoo kale. Haddii aadan weli isku qorin, fadlan la xariira macalinkaada si aad uga wada hadashaan waqti aad la kulmi kartiin. Waad ku mahadsan tahay sida aad u xanaanaysid caruurtaada in ay qaatan waqti ay kula kulmaan macalinkooda..

Inta aad halkaan ku sugan tahay, waxaan kaa codsaneynaa in aad fadlan kaalmeysid dugsigena adiga oo buuxiya wareysi. Wareysigaan wuxuu ku weydiin doonaa dhowr su'aal oo ku saabsan macalinka cunugaada, dugsiga, iyo agaasimaha. Waxay ku siin doontaa fursad aad ku xustid waxa aad ku jeceshahay macalinkaada iyo dugsiga, iyo in aad soo jeedisid talooyin la xariira sida aan u horumarin karno dugsigena. Inta aad ku sugan tahay dhismaha, shirarka ardayga/tababaraha/waalidka, waxaan soo dhaweyneynaa in aad soo martid shaybaarkena kombuyutarka muddo dhowr daqiiqo si aad kombuyutarka uga buuxisid wareysigaan. Waxaan soo dhaweynaa waqtiga aad gelisid in aad na siisid war celin.

Labiska ardayda

Waxaan aragnaa arday badan oo aan qabin labbiska dugsiga. Xasuusin ahaan, ardayda waa in ay soo qaataan labbis midabadiisu ka kooban yahay baluug, caddaan, iyo khaki. Waxaan dhawaan baddalnay labbiska si loogu darro baluugga culus. Waxaan kaloo ogolaanay isbaddal oo u ogolaan doono ardayda in ay soo qaataan labbis kasta oo mattala jaamacadda. Waxaan xoogga saarnaa sida aan u yeelano hiddaaha kulliyadda. Waxaan rabnaa in ay ardayda isu arkaan sida ardayda jaamacadda mustaqbalka. Mountain View, waan soo dhaweyneynaa labbis kasta oo mattala kulliyadda ama jaamacadda maalin kasta oo ka mid ah todobaadka.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wadahadalkena xiga ay yeeshaan Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maalinta Talaadada, Febraayo 28 marka ay tahay 8:15. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.